



Tababarka xirfaddeed ee Iswiidhishka

Koorsooyinka Tababarka Xirfadaha ee Iswiidhan waxa aad ku baran kartaa in aad ka shaqayso shaqada la doortay, ama in ay kuu ogolaato in aad sii wado waxbarasho dheeraad ah Iswiidhan gudaheeda. Tabarka xirfadaha Iswiidhan waxaa iska leh dadka mid uun aan dhammaanba shaqayn, ama wax yar ka shaqeeyay gudaha Iswiidhan. Qayb ka mid ah kooraska waxaa lagu fulin karaa goobta shaqo oo lagu bedelay casharo dhigaal ah goobta Eductus.

Wax ku saabsan Tababarka Xirfadaha ee Iswiidhish

Dhigaalka oo lagu daray khibrad farsamo

Tusaale ahaan, waxaad ku qaadan kartaa wakhti goobta shaqada si aad ugu hadasho afka adoo kula hadlaya Af Iswiidhish saaxiibada shaqada oo baranaya sida goobta shaqadu u shaqayso. Casharada dhigaalka aha iyo hadalo la jeedinayo oo ka dhacay Eductus. Casharka dhigaalka ah waxa uu xooga saaraya suuqa shaqaalaynta iyo tababarka xirfadda Iswiidhishka ah.

Qorshaha waxbarashada ee shakhsiyeed

Si aad degdeg ugu gaadho ujeedadaada, adiga iyo macalinkaaga Eductus waxay ku bilaabaan u diyaarinta si wada jir ah qorshe wax barasho. Koorasadan waxaa loo fulin karaa mid uun si buuxda- ama nus gelin ahaan. Waxay ku dhammaataa 10 wiig laakiin way ka gaaban kartaa waanay ka dheeraan kartaa.

Ku dar tababarka xirfadeed

Haddii aad doonayso in aad ku darto Tababarka xirfadaada Iswiidhish tababar xirfadeed, sidoo kale tan waad nala samayn kartaa. Waxaanu bixinaa koorsooyin bilow ah ama qaybo kala duwan, tusaale ahaan, Warshadaha, ku kaydinta alaabta bakhaarada/gaadiidka, adeegyada/tafaariiqda iyo daryeelka caafimaad/dugsiyada/daryeelka bulshadda. Sidoo kale waxaad ku dari kartaa koorsooyinkaaga shaqo hordhac ah (instegsjobb) ama SFI.

Maxay Tababarka Xirfada Iswiidhish kuu hogaamisaa?

Ujeedada koorsadu waa in ay kaa caawiso in aad u hesho shaqadda si degdeg ah. Si aad shaqo uga hesho Iswiidhan waxaad caadi ahaan u baahantahay in aad ugu fiican tahay aad luqadda Iswiidhishka. Tababarka Xirfadda Iswiidhish waxay xooga saartaa Af Iswiidhishka gudaha goobta shaqada. Sidoo kale waxaad baran kartaa habka dhaqanka shaqaalaha shirkadda iyo maamulku u wada shaqeeyaan ee Iswiidhan.

Yaa loogu talo galay koorsada?

Haddii aad shaqo doon tahay oo aad ka diiwaan gashan tahay Arbetsförmedlingen (Adeega Shaqadda ee Dad waynaha) waxaad ka codsan kartaa koorsadan adoo soo marayo shaqaalaha kiiska. Koorsadan waxay ku habboontahay dadka u baahan in ay ku hadlaan Afkooda Iswiidhishka si ay awood ugu yeeshaan in ay ka shaqeeyaan gudaha Iswiidhan. Dadka hadda ka horba ka haysta takhasus xirfaddeed wadamadoodii, ama garanaya waxa laynka shaqada ay doonayaan yahay si ay u raacdeeyaan gudaha Iswiidhan.

Aqoontee hore ayaan u baahanahay?

Waxba.

Sababteen u dooranayaa Eductus?

- Waxaanu xooga saarnaa baahiyahaaga. Waxay kaa caawisaa in aad degdeg wax u barato.
- Waxaad la xidhiidhi doontaa caalamka shaqada.
- Waxaa lagu siin doonaa caawimada qorida khibrada shaqo (CV) iyo warqaddaha codsashada ee codsiyada shaqadda.

Sida loo codsado

Lahadal shaqaalaha kiiskaaga xaga Arbetsförmedlingen.